

HALYEY WAA DHINTA EE YAAN LAWADA HANJABIN.

Dhalinta soomaaliyeed ayaa sanadihii lasoo dhaafay ku howlanaa inay door ku yeeshaan dib udhiska iyo soo noolaynta haybaddii iyo sharafti dalkeena hooyo.

Dhibaatooyin soo dhigna muddo dheer oo dhalintu dharab iyo dhallaanba uso joogeen waxay ku dhiiradeen inay ka dhex muuqdaan meelaha laga go'aamiyo hoggaanka iyo hagidda dalka sida golaha shacabka ,fulinta iyo garsoorka, sidoo kale waxay dhalintu door aan la dhayalsan karin ku lahaayeen kobcinta iyo hormarinta hay'adaha gaarka ah iyo ururada iskood isu xil qaama oo dano iyo duruufo badan bulshada uga jawaaba .

In badan oo dhalinta soomaaliyeed ka mid ah waxay muujiyeen dadaal iyo adkaysi duruufo adag bayna ku koreen waxna ku barteen cilmi ahaanna maanta waa kuwo asaagood la oran karo way ka agdhowaan karaan marka loo tixgeliyo meeshay wax ku barteen kuna barbaareen.

Saaxadda siyaasadeed iyo midda dhaqan oo aysan dhalintu wax dhowrid ah kula hayn ayaa mergi iyo mudac afkiis ku noqotay dhalinta soomaaliyeed oo ma aysan helin deegaan(environment) u gogol xaaraya oo aragtiddooda u saamaxaya inay si fudud ugu suurta gasho.

Dhalinta oo lagu qiyaaso boqolkiiba todobaatan 70%inay ka tahay bulshada soomaaliyeed ayaa mudnaan wanaagsan ku lahayn mustaqbalka jooga ee dalka waxaana lagu maaweeliya in badan waxaa tihiin ubaxi dalka iyo mustaqbalkii berito,taas oo aad mooddo inay la mid tahay ninkii dukaanka lahaa oo wejihadda hore ku qortay “dayn manta maya berrise haa”.

Qorax sacab ma qariyee waxaa u suurta gashay dhalin badan inay sanadka ka dhexmuuqdaan golayaasha dowladda cusub,halka kuwo badan oo ku taamayeyna laga turuntureeyey oo aysan u suurta gelin inay nasiib u helaan hanashada heerarkii ay ku hamminayeen.

Dhalinyarada Haldoorka noqday oo meekhaan iyo martabadba ugu sarreeyey dhalinta soomaaliyeedna ay halkooda hiigsanayeen waxaa ugu horreeyey Rabbi ha raxmeeyee wasiirkii howla guud iyo dib u dhiska dalka, mudane cabaas siraaji oo aynu tacsidiisa joogno, madaxana laga toogtay isagoo si dhowran oo dhul dhig ah u maraaya dalkiisa hooyo hammigiisuna uu ahaa inuu cirib tiro rafaadkii iyo ragaadkii uu beryo usoo joogay isagoo ay usii dheerayd noloshii qaxootinimo,balse waa tii la yiri”Aadanow waxaa maagantahay adiyo maankaagu iyo meel ilaahay ku marin kala mid weeyaane” Rabbi ha u naxariisto ma dhinte waa Ilaaah.

Dhimashadii cabaas ka dib dhalinta soomaaliyeed ayaa aad dhiilo uga muujay dhacdadaa foosha xun, waxayna dhaheen iyagoo

dareenkooda cabiraya “qalbiga ayaa na jabay rajadii aan soomaaliya ka lahaynna dhulkay gashay” waxaana baraha bulshada ku arkaysaa dhalinyaro saqda dhexe wax soo qoraaya oo aad moodo inay ledi waayeen oo ay laabtu gubanayso.

Soomaali been ma maahmaahde waxay dhehdaa "Nin aan kufin ma kabsado"ama “waxaan dhib loo marin dheeldheel laguma helo” oo guul kasta waxaa ka sukeeya rafaaad iyo dhib badan,hanti badan iyo nafo badan baana lagu waayaa waddada guuusha, balse adkaysi dabadiis waa la gaara haddi guuleedo badan oo barta kasii wada la helo .

Dhiganahaan waxaan uga danleeyahay inaysan dhalinta soomaaliyeed han jabin e ay shidaal iyo shumac huraaya ka dhigtaan dhimashada halyeeyo badan oo hortooda ka ifaayey,aanna uga aarsan karno cadowgeenna inaynu booskay banneeyeen buuxinno oo uusan noqon gablan aan barbaar badani ka danbayn.

Tusaale waxaan usoo qaadan karna

Duullaankii Mu'ta ayaa nebigu ciidan wuxu u diray jihaad wuxuuna u sameeyey hoggaamiye(Amiir) la yiraahdo Zayd haddi la dilana cid bedeshaa meesha kama maqnayn.

Hoggaamiye 1aad ayaa la dilay saa waxa calanka qaadayJacfar oo hoggaamiye 2aad noqday,midigta ayaa go' day suu bidixduu ku qabsaday calanki,saa bidixdiina waa laga gooyey suu qaab xeeladaysan buu calankii u qabsaday suu dhulka uga ilaasho calanka, oo haddu dhulka ku dhaco ay la micno tahay inay ciidankii jabeen, ka dib waxaa qabtay calankii oo hoggaamiye 3aad noqday Cabdullahi,isna waa la dilay intaa ka dib waxaa

hoggaankii la wareegay oo calankii qaaday,KHaalid binu waliid oo gaaladii jebiyey guushiina horseeday, sadex hoggaamiye markii laga dilay hal duulaan dhexdiis,mana dhicin inay niyad jabaan balse marba mar guushay ugasii dhowaanayeen,Waana arin tilmaamaysaa guusha aad hiigsanayso inaysan ku dhammaanayn qof iyo laba lagaa dilay ama halyeeyo badan oo la waayey.

Sidoo kale waxaa tusaale inoo noqon kara dadaalkii ay muujiyeen dowladihi yurub markii canshuurta ku qaaliyeysay dowladdii islaamka (cusmaaniya) oo ay hormuudka ka ahaayeen nimanki bad mareennada ahaa ee reer yurub si ay u helaan jid ku xira hindiya oo ganacsigu markaa ka furna.

Dadaalkoodii baaritaanka intay ku guda jireen waxaa ku dhintay niman badan,balse kuwo kale ayaa halkii uu ku joojiyey kasii anba qaaday ka dibna guusha soo taabtay, oo waa tii ninkii la oran jirey Karistofar kolombes isagoo ku jira socdaalkiisii jid raadiska 1492 miilaadiyada uu helay Qaaradda hadda loo yaqaan AMERICA, isagoo u haysta inuu tigay meel ka mida xeebaha hinda oo waa tuu dadkii deganaa taariikhda ugu qoray hunuud(هنود),isagoo aan weli aqoonsan inuu caalam cusub helay ayuu dhintay sanadkii 1507.

Ka dibna waxaa ka dabo qaatay nin la oran jiry Amrico oo sheegay inuu yahay caalam cusub wuxuu helay saaxiibkiis karistofar,saas baana loogu magac darey qaaradda dhan ee AMERICO.

Haddaba dhalinyaro haddaan tagtada dib u jalleecno waxaan dareemayna in dhibaatooyin badan loo maro markii la rabo in dhibaato laga baxo oo baraare lagu haminaayo la gaaro, yoolalna

larabo in laga dhabeeyo,waa inaan lagu quusan af iyo adin wixii ku hor istaaga balse ay dhiiranaan iyo dhidaal usii noqoto,arin kasta oo caqabad noqotana cashar laga barto bud dhigena looga dhigo howlkasta oo la hayo.

GABOGABO:

Gundhacca qoraalkaygu waa in aynu muujinno dhiiranaan iyo dhego waddanaan,maxaa yeelay hadafkeennii ma dhiman ee halyeey baa dhintay aan u baahnayn in naftiisa loo hiiliyo balse u baahan in hadafkiisi iyo hammigiisii loo hiiliyo, taas oo micneheedu yahay dhaxalka dalka innagaa iska leh dhiig badan baa loosoo daadshay,hadda loo daadinayaa ,waana loo daadin doonaa si ay dhib yari caruurteennu u dheefsato sharafteennuna u dhowrnaato.

Sidoo kale aan dareenno in jidka rajadu cagaag badanyahay cago bandanna lagu waayayo ,hagar damada ku heeran qofkastoo hal door ahna ay tiro beel tahay,berrina aan lala fajacin haddi halyeey dhinto balse la feejignaado ,qofna tiisa dhaafmaayo sidaa darted maalmaha aad nooshahay inaa geesinimo iyo gubanimo muujisid garaadkana dadkaaga ugu gar-gaarto baa kula gudboon.

TOLO BIXIN(RECOMMENDATION)

Dowladda:

- Booskii wasiir cabbaas inay ku bedelaan qof dhalinyaro ah oo u dhigma
- Chucuurta dhalinta soomaaliyeed inay dhowrto kana neefiso naqaska dhuunta taagan.
- Inay umadda soomaaliyeed uga faa’iidayso awoodda dhalinyarda curdinka ah, isuna kaashato khibradda odayaasha iyo awoodda da’yarta.
- Qiimaha qofka soomaaliga waa inuu kala sarreeya waxkasta oo ay gacanta ku hayso,horayna u hor kacda

(waddaa)dareenka dadka dowladnimada raba.

DHALINYARADA:

- Inay awoodda saaraan korinta iyo tayaynta aqoontooda iyo xirfadooda(building capacity)
- Inay ka dheeraadaan cuduradii haleelay aabbeyaal oo halkaa dhigay hasheenii madiga ahayd ee MAANDEEQ.
- Dhulkeenna aynu hoos u eegno hufnaantuna waa ciidda hooyo oo aad u hagar baxda
- Inan iyo inanksta waa in booska ay ku hamminayaan ka gungaaraan oo aynu dhehnaa barbarkay ka baxdaa waa bakayla galeen.
  Tusaale cilmiga uu baranayo waa in uu meel ka gaaro qofkasta qaybta uu doortay ka toosiyaa dalka sida siyaasadda,dhaqaalaha,technolojiyadda ,sharciga iyo diinta,caafimaad cilmiga beeraha ,badda,xoolaha iwm.

AKHRISTE Waxaa damaanad qaadaysaa oo masuul ka tahay afkaaga, adinkaaga iyo aragtidaada sina qayb hakaga noqon wax dhibaato ku ah diintaada,dadkaaga ama dalkaaga ,ha raacin dookh ee diin raac.
W/Q:Jaamac maxamed xasan Alcaddaala

AKHRI OO FAAFI MAHADSANID.

Wixii dhaliil ama dhiiri gelin ah waan aqbalayaa iga soo gaarsi:
EMAIL: ALLCADDAALA@GMAIL.COM.

Ama barta facebook@: jaamac alcaddaala